



## **Kasoo Ergisashada Chromebook Laybareeriga Magaalada Springfield**

Kusoo dhawaada ka ergisashada Chromebook Laybareeriga Magaalada Springfield!

*Chromebook-yada waxaa lagu helaa deeq lacageed oo laga heley Emergency Connectivity Fund (ECF) oo ay maal geliyeen Federal Communications Commission (FCC). Yoolka barnaamijku waxaa weeye inuu bixiyo teknooloojiyada lagu geli karo internetka oo la siiyo dadka aan awooda u lahayn.*

**Waa kuwan dhawr shay oo ay tahay inaad ogaato kahor inta aanad ergisan Chromebook:**

Dadka ergisanaya Chromebook-gu waa inay ahaadaan 18 jir oo waa in xidhiidh wanaagsan ka dhaxeeyaa laybareeriga.

Kaliya hal Chromebook ayaa loo ogol yahay halkii kaadh siteba.

Chromebook-yadu waxaa la ergisan karaa ilaa 14 maalmood. Hadii Chromebook-ga aan lagu soo celin 3 maalmood gudahood kadib marka la gaadho taariikhda uu ku eeg yahay, aalada waa la bakhtiin doonaa oo Chromebook-ga lama isticmaali karo. Dib u cusboonaysiinta lama ogola.

Chromebook-ga waa in laga ergistaa oo loo celiyaa xafiiska hore ee laybareeriga. Fadlan adiga oo gacanta ku wada usoo celi aalada xubin shaqaalaha ku sugan isla goobta laybareeriga ee aad ka ergisatay si markaa looga masaxo kaadhka laybareeriga oo qofka xigaa u qaadan karo. **HAKU** ridin Chromebook-ga sanduuqa lagu rido buugta.

Chromebook-yada waa in lala soo celiyaa xadhiga dabka, iyo shandada lagu qaado isaga oo wata Laybareeriga oo u shaqaynaya sidii lagugu siiyay. Fadlan soo celi Chromebook oo aad dabkiisa soo buuxisay.

Inta uu qofku haysato, Chromebook-ga waxaa ka masuul ah cida ergisatay. Cida ergisatay waxay u hogaansami doontaa siyaasada isticmaalka la ogol yahay ee internetka laybareeriga marka la isticmaalayo Chromebook-ga.

Hadii Chromebook-ga uu waxyeeloobo, ama aanu shaqaynaynin, waxaad kusoo celisaa xafiiska wareejinta laybareeriga oo waxa aad u sheegtaa waxyeelada shaqaalaha ah.

Laybareerigu kama masuul aha wixii fayl, macluumaad ama macluumaadka shakhsi ahaaneed ee laga galo/gudbiyo iyada oo la adeegsanayo Chromebook-ga. Chromebook-ga waxaa laga saari doonaa dhamaan macluumaadka marka lasoo celiyo.

Laybareerigu ma saarna masuuliyada waxyeelada tooska ah, dadban ama isasoo taraysa ee la xidhiidha isticmaalka Chromebook-ga, oo ay ku jirto waayitaanta macluumaadka, ama sirtaada la jabsado. Dadka isticmaalaya Chromebook-yada wixii khatar ah ee ka timaada iyaga ayay saaran tahay oo wixii khasaare ah iyaga ayaa ka masuul ah ficiladooda.

Ficilka sharci darada ah ee agabka Laybareeriga ama adeegyada waxaa sidoo kale ka iman karta ciqaab maxkamadeed.



Isticmaalka Chromebook:

- Shid Chromebook-ga adiga oo gujinaya badhanka shidida ee dhanka midig ee sare ee kiiboodhka.
- Waxa aad isticmaali kartaa macluumaadka lagu gelo Google ee hore ama qolka Martida hadii aanad lahayn.
- Raac tilmaamaha shaashada kasoo baxaya ee ku xidhiidsamida Wi-Fi.
- Marka aanad isticmaalaynin, Chromebook-gu waxa uu si toos ah u geli doonaa hurdada, ama waad bakhtiin kartaa.

*Xasuuso inaad dabaysato Chromebook-ga si aad u xaqiijso in aad isticmaali karto marka aad doonayso inaad isticmaasho. Si aad u dabaysato Chromebook-ga, waxa aad gelisaa xadhiga dabka daloolka UBS oo waxa aad gelisaa fiishta. Heerka dabka ku jira waxa laga arki karaa dhanka bidix ee hoose ee shaashada.*

**Mushkilado? Fadlan la xidhiidh Laybareeriga Magaalada Springfield ee deegaankaaga wixii kaalmo ah, ama booqo websaytka Laybareeriga.**



**HESHIISKA CHROMEBOOK-GA**

**Xarfaha Uruuriska Magaca ee Ergistaha** \_\_\_\_\_ waxa aan cadaaynayaa in aanan haysan agab ama adeegyo aan ku galo Internetka. Waxa aan u ergisanayaa Chromebook-ga si aan u galo.

**Shaqaalaha Ayaa Isticmaalaya (Staff Use)**

**Taariikhday ku eeg tahay (Due date):** \_\_\_\_\_

Magaca Isticmaalaha (Borrower Name): \_\_\_\_\_ Lambarka Taleefanka \_\_\_\_\_

Saxeexa Ergistaha (Borrower Signature): \_\_\_\_\_ Taariikhda: \_\_\_\_\_

Lambarka Kaadhka Laybareeriga Daymaystaha (Borrower Library Card Number): \_\_\_\_\_

Aqoonsiga Chromebook \_\_\_\_\_ Lambarka Taxanaha ah \_\_\_\_\_

Taariikhda la qaatay: \_\_\_\_\_ Xarfaha Uruuriska ee Magaca Shaqaalaha \_\_\_\_\_

Taariikhda la keeney: \_\_\_\_\_ Xarfaha Uruuriska ee Magaca Shaqaalaha \_\_\_\_\_